



**Kaalay oo ka  
qaybqaado  
waxqabadka  
ikhtiyaariga ah!**

**Helsinki**

# Nolasha wanaagsan ee Helsinki ka jirta

Waxa magaalada Helsinki bixisaa hawlo badan oo ikhtiyaari ah oo kala duwan, kuwaas oo aad si la taaban karo ugu caawin karto dadka magaalada deggan ee ay da'doodu kala duwantahay ama waxaad uga qaybqaadan kartaa wax ka qabashadabey'adeenna naga dhexeysa. Waxaad u shaqayn kartaa sidii caawiyaha munaasanadaja dhaqanka, waxaad taageeri kartaa dhallinyarada, waxaad noqon kartaa, saaxiibka ku lugaynta jardiinada, saaxiib u noqon kartaa dadka waayeelka ah ama hage kooxeed.

Waxaan ku siinaynaa haddii loo baahdo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha la kala dooran karo iyo fahamsiinta hawsha aad dooratay. Waxaad sidoo kale saamayn ku yeelan kartaa waxyaabaha waxqabadka ku jira haddii aad doonaysana waxaad iskaa u samayn kartaa shaqada ikhtiyaariga ah. Soo dhowow oo nala abuur dhaqanka magaalada iyo nolol wanaagsan adigoo ka qaybqaadanaya waxqabadka ikhtiyaariga ah – waxaa loo baahanyahay caawimaaddaada.

*Waxqabadka ikhtiyaariga ah waa waxqabadka aan mushaar lagu qaadan oo loo qaybtay dadka, deegaanka iyo bulshada, kaas oo ku salaysan rabitaanka iyo niyad u haynta xorta ah ee qofka. Waxqabadka ikhtiyaariga ah wuxuu horumariyaa qayb ka ahaanshaha iyo nolasha wanaagsan.*

**Sharraxaadda waxqabadka  
ikhtiyaariga ah ee magaalada Helsinki**



*“Waa wax aad u fiican in aad qof ku caawiso wax aad u yar. Wax badan ayaan anigu nolasha ku helay, sidaas darteed ayeey wax fiican iigu muuqataa in aan wanaagaas siiyo qof kale.”*

*Ikhtiyaari*

**Saddex qaab oo fudud oo looga qaybqaadan karo waxqabadka:**

1. Ka hel bogaggeena shabakadda hawsha adiga kugu habboon. [vapaaehtoistoiminta.hel.fi](http://vapaaehtoistoiminta.hel.fi)
2. Ka qaybqaado tababarada iyo munaasabada. [vapaaehtoistoiminta.hel.fi/tapahtumat](http://vapaaehtoistoiminta.hel.fi/tapahtumat)
3. Dalbo warsideheenna. [vapaaehtoistoiminta.hel.fi/uutiskirje](http://vapaaehtoistoiminta.hel.fi/uutiskirje)



# Nala soo xiriir

Dhaqanka iyo wakhtiga firaaqada  
Waxqabadka ikhtiyaariga ah

09 3104 6940 | 09 3106 4884 | 09 3103 7147

-  [vapaaehtoistoiminta.hel.fi](http://vapaaehtoistoiminta.hel.fi)
-  [vapaaehtoistoiminta@hel.fi](mailto:vapaaehtoistoiminta@hel.fi)
-  [VapaaehtoistoimintaHelsinki](https://www.facebook.com/VapaaehtoistoimintaHelsinki)

Helsinki